

## ***Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan isbedelo suurtoagal ah oo lagu sameeyo xeerarka socdaalka ee ku saabsan dheefaha dadweynaha***

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington (DSHS) waxay ogtahay isbedelada lasoo jeediyay ee lagu sameynayo xeerarka socdaalka kuwaas oo lagu dabakhi karo dadka qaata dheefaha dadweynaha. Waxaynu ilaalinaynaa isbedeladaan suurtoogalka ah in ay dhacaan waxaana doonaynaa in aynu siino macluumaad sax ah oona la isku halayn karo dadka iyo qoysaska ay dhici karto in ay saamayso bedelida siyaasadaha. Halkan waxaa ku qoran waxa aynu ognahay.

- Barnaamijta iyo adeegaha laga maamulo ama laga bixiyo dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington (DSHS) waxay ahaanayaan kuwo sidooda ah oona ay heli karaan dadka u qalma.
- DSHS waxay sii wadaysaa in ay ilaaliso sir ahaanta macluumaadka shakhsiyeed ee macamiilka mana la wadaagayso macluumaadkan qofkale aan ka ahayn haddii loogu baahdo dhinaca sharciga gobolka ama federaalka.
- Wakhtigan la joogo, ma JIIRAAN wax isbedelo ah oo lagu sameeyay xeerarka federaalka oo la dhaqan geliyay. Hadda ma jirto wax saamayn ah oo ku dhacay dheefaha ay qaateen macaamiisha u qalanta.
- Isbedelka lasoo jeediyay wuxuu saamayn karaa dadka codsanaya deganaansho sharciiyeed oo joogto ah (kaararka cagaarka ah) ama soo gelida Waddanka Maraykanka, ay ku jirto viisada lootariga la siiyo qaxootida iyo codsashooyinka lagu cusboonaysiiyo, bedelid ama kordhin mudada fiisadooda ah ee ku saabsan mudada joogitaankooda Waddanka Maraykanka.
- Isbedelada lasoo jeediyay ma saamaynayaan dadka haysta deganaansho sharciiyeed oo joogto ah (kaararka cagaarka ah) kuwaas oo codsanaya dhallashadooda Maraykanka ama jinsiyaynta.
- Hadda, shaqaaluhu kaliya waxay xisaabin karaan isticmaalka macamiilka uu isticmaalo caawimaada lacagta cadaanka ah ama isbitaal dhigid caafimaad muddo-dheer ah marka ay doonayaan in ay sameeyaan codsigooda socdaalka. Isbedelada lasoo jeediyay waxaa lagu darayaa qaar kamid ah daryeelka caafimaadka, dheefaha nafaqada iyo guryaynta, ay ku jirto Cuntada Aasaasiga ah ee Washington ama SNAP.
- Siyaasada lasoo jeediyay ma noqon doonto mid leh ficil celin soo noqod ah. Ma tixgelinayso dheefaha maanta la helay. Icticmaalida dheefahaan federaalka ee dheeraadka ah waxaa kaliya la tixgelinayaa marka la helo kadib marka xeerka la dhameeyo.

- Isbedelada lagu dabakhayo dhammaan noocyada dheefaha federaalka. Si aad u heshid liiska dheefaha isbedelka lagu daray ama laga reebay, firi Su'aalaha Inta baddan Laweydiiyo. Ma JIRAAN wax isbedelo ah oo lagu sameeyay dheefaha gobolka.
- Xeerkan cusub ma ahan mid lagu dabakhayo dadka oo dhan. Ma ahan mid lagu dabakhayo dadka qaxootida ama magan-galyo raadiska ah, qaxootida Aasiyaanka Maraykanka (Amerasian), Qaxootida Khaaska ah ee Iraaqiyiinta iyo Afgaanistaanka ah kuwaas oo Haysta Fiisado, Dadka kasoo gala Kuubo/Haitian, dadka xuquuqaha aadanaha u dooda ee lagu sii daayay si shardi ku xiran ama siideyn sharafeed, dhibanayaasha ka ganacsiga banii'aadamka (Fiisada-T), dhibanayaasha hawl dembiyeed (Fiisada-U), Qaxootida Dhallinyarada Khaaska ah ama VAWA (Hawl Dhibaato Loo Gaysto Dumarka) codsashooyin-shakhsiyeed.
- Xeerkan cusub ma xisaabayo isticmaalka dheefaha ka ahaada dhinaca xubnaha qoyska ee qofka. Isticmaalida dheefaha ka ahaada carruurta ama xubno kale oo qoyska ah ma ahaan doonto mid loo xisaabo si lid ku ah qofka codsanaya deganaanshaha sharciyeed ee joogtada ah (kaararka cagaarka ah) ama soo gelida Waddanka Maraykanka.

Dadka iyo qoysaska qabba su'aalooyin ama wel-welo khuseeya saamaynta isticmaalida dheefaha dadweynaha ee ku saabsan xaaladooda socdaal waxaa khasab ku ah in ay la xiriiraan qareenka socdaalka. Xogaga waxaa laga heli karaa tooska mid kamid ah ururada lagu qoray bogga internetka Guddoomiyaha gobolka: <https://www.governor.wa.gov/issues/issues/safe-communities/immigration-and-refugee-resources>. Intaas waxaa sii dheer, waxaad la xiriiri kartaa mid kamid ah ururadaan soo socda si aad u heshid caawimaad:

- Khadka marwalba shaqeyya ee CLEAR: 1-888-201-1014
- Mashruuca Xuquuqaha Qaxootida Waqooyi galbeed (NWIRP):
  - Xafiiska Seattle ee NWIRP: 206-587-4009
  - Xafiiska NWIRP Yakima Valley (Granger): 509-854-2100
  - Xafiiska NWIRP Wenatchee: 509-570-0054